



U.S. Citizenship
and Immigration
Services

Office of Public Affairs

War Saxaafadeed

27ka Agoosto, 2018

Muddada Dib-isku-Diiwaangelinta ayaa Hadda u Furan kuwa Heerka Ku-Meel-Gaarka Loo Ammaangaliyo ee loogu talagalay Soomaaliya.

WASHINGTON—Adeegyada Muwaaddininmada Iyo Socdaalka Mareykanka [U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS)] ayaa maanta ku dhawaaqday in ka-faa'iideystayaasha/ku jooga Heerka Ku-Meel-Gaarka Loo Ammaangaliyo (TPS) ee loogu talagalay Soomaaliya ee doonaya inay sii wataan/haystaan heerkooda illaa muddada u-dheeraynta ee ah 18ka-bilood ee dhammaanaysa 17 Maarso, 2020, ayaa ah inay dib isku diiwaangaliyaan inta u dhexaysa 27ka Agoosto ilaa 26 Oktoobar.

Hanaanka dib isku diiwaangelinta, oo ay ka mid tahay sida dib loogu cusboonaysiiyo dukumentiyada u fasaxa shaqada [employment authorization documents (EADs)], ayaa lagu daabacay [Federal Register](#) iyo barta internetka uscis.gov/tps.

Dhammaan codsabayaashu waa inay soo gudbiyaan Foomka I-821, oo ah Codsiga loogu talagalay Heerka Ku-Meel-Gaarka Loo Ammaangaliyo . Codsabayaasha ayaa walibana weyddiisan kara dukumentiyada u fasaxa shaqada (EAD) iyagoo soo gudbinaya, markay buuxiyaan Foomka I-821, Foomka I-765, Codsiga u Fasaxa Shaqada , ama si gooni ah mar ay tahay waa dambe. Sida foomamka USCIS oo dhan, labada foomamba ayaa si bilaash ah looga soo dejisan karaa barta internetka USCIS ee ku taal uscis.gov/tps.

USCIS ayaa waxay soo saari doonta dukumentiyada u fasaxa shaqada (EAD-yada) ee cusub oo leh taariikhda codsiga kama dambaynteeda 17 Maarso, 2020 oo ku wajahan ka-faa'iideystayaasha/ku joogayaasha TPS ee uqalma ee sida wakhtiga dhowraysa dib isku diiwaangeliya una codsada EAD-yada. Wakhtiga cayiman ee loogu talagalay marka la eego nidaaminta codsiyada dib-u-diiwaangelinta TPS, hase ahaatee, waxaan ogsoonnahay inayna dhammaan dadka dib-isku-diiwaangaliyaa ayna heli doonin fasaxa shaqada EAD-yada cusub kahor inta ayna EAD-yadooda hadda ay haystaani ka dhicin 17ka Sebtembar, 2018. Sidaa awgeed, waxaan si toos ah ugu dheeraynaa ansaxinta EAD-yadaas illaa 180 maalmood, oo ah ilaa 16ka Maarso, 2019.

Markay ahayd 19ka bishii Luulyo, 2018, Xoghayaha Guud Amniga Dalka Kirstjen M. Nielsen ayaa ku dhawaaqay in xaaladaha sharciga ah ee taageeraya ugu talagalidda TPS ee salka ku haysa colaadaha hubaysan ee hadda jira iyo xaaladaha aan caadiga ahayn ee sii jira awgeed ay tahay in ugu talagalaka la kordhiyo 18 bilood. Xoghaye Nielsen ayaa go'aankeeda gaartay ka dib markii dib loo eegay xaaladaha dalka iyo la tashaday hay'adaha dawladda Maraykanka ee arrinta



**U.S. Citizenship
and Immigration
Services**

Office of Public Affairs

ku habboon kala tashigooda. Sidaa darteed, ugu talagalka TPS ee Soomaaliya ayaa la kordhiyay illaa 17ka Maarso, 2020.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan USCIS iyo barnaamijyadeeda, fadlan booqo uscis.gov ama nagala soco Twitter ([@uscis](https://twitter.com/uscis)), Instagram ([/uscis](https://www.instagram.com/uscis)), YouTube ([/uscis](https://www.youtube.com/uscis)), iyo Facebook ([/uscis](https://www.facebook.com/uscis)).

- USCIS -